# XUQUUQAHA SHAQAALAHA

## SIDA KU CAD XEERKA XIRIIRKA SHAQADA QARANKA

**NLRA waxay damaanad qaadaysaa xaqa ay shaqaaluhu u leeyihiin inay abaabulaan oo ay si wadajir ah ula gorgortamaan shaqa bixiyaha, islamarkaana la galo hawlo kale oo si wadajir ah loo ilaaliyay. Shaqaalaha NLRA* ceymisay waxaa laga ilaaliyay qaar kamid ah noocyada shaqo bixiyaha iyo anshax xumada ururka. Ogeysiiskan wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo kusaabsan xuquuqdaada, iyo waajibaadka shaqo bixiyayaasha iyo ururada hoos yimaada NLRA. La xiriir Guddiga Xiriirka Shaqaalaha Qaranka, wakaaladda Fadaraalka ee baarta islamarkaana xallisa cabashooyinka hoos yimaada NLRA, adigoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka hoose, haddii aad wax weydiimo ah ka qabto xuquuqaha gaarka ah ee suurtagalka ah in lagu dabbakho goobtaada shaqada gaarka ah.**

### Marka loo eego NLRA, waxaad xaq u leedahay:

- **Abaabulka urur** la xaajooda shaqo bixiyahaaga khuseeya mushaharkaaga, saacadaha, iyo shuruudo kale iyo sharciyada shaqaaleynta.
- **Sameynta, ku biiridda mise caawinta urur.**
- **Gorgortan wadajir** iyadoo loo marayo wakiillada shaqaalaha iyagoo dooranaya kunturaad lala galo shaqo bixiyahaaga si loo dajiyo mushaharkaaga, dheefahaaga, saacadahaaga, iyo xaaladaha kale ee shaqada.
- **Kahadalka shuruudahaaga iyo sharciyada shaqada** mise ururka isla abaabulaya saaxiibada shaqo mise urur.

### Marka loo eego NLRA, waa sharci darro in urur mise ururka kugu matala la gorgortanka shaqo bixiyaha uu:

- **Kuugu hanjabo** inaad weyn doonto shaqadaada ikaa aad taageerto ururka mooyaane.
- **Kuu diido inaad cabasho gudbiso** sabab awgeed inaad daleeceysay saraakiisha ururka mise inaad xubin ka ahayn ururka.
- **Isticmaalo mise sii wada heerarka mise habraacyada takoorka** si uu uga dhigo samaynta tixraaca shaqada hoolka shaqaaleynta.
- **Sababta mise iskudayga inaad u horseeddo shaqo bixiye inuu ku takooro** sabab la xiriirta waxqabadka ururkaaga.

### Marka loo eego NLRA, waa sharci darro in shaqo bixiyaha uu:

- **Kaa mamnuuco inaad hesho urur inta lagu jiro waqtiga aan shaqada ahayn,** sida shaqada kahor mise kadib mise waqtiga nasashada; mise qeybinta goobaha suugaanta ururka waqtiyada aan ahayn shaqada, sida goobaha baabuurta la dhigto mise qolalka nasashada.
- **Wax kaa weydiiyo wax kusaabsan** taageerada mise howlaha ururkaaga qaab aan kugu dhiirrigalineynin adiga inaad ka qeybgasho howlaha.
- **Ku ceyriyo, hoos kuu dhigo, mise ku badalo, mise yareeyo saacadahaaga mise badalo shaqadaada,** mise haddiikale tallaabo xun kaa qaado, mise

- **Tallaabo la qaado** mid mise in kabadan saaxiibo shaqo si ay u horumariyaan xaaladaada shaqo iyagoo isticmaalaya, wadiiqooyin kale, sarena ugu qaadaya cabashooyinka shaqada la xiriira si toos ah shaqo bixiyaha mise wakaalad dawlad, islamarkaana caawimaad ka raadinaya urur.
- **Bannaanbax iyo isku imaad,** iyadoo lagu xirayo ujeedada mise wadiiqada bannaanbaxa mise isku imaadka.
- **Dooro inaadan samayn mid kamid ah hawlahan,** oo ay kujirto ku biirista mise ku ekaanshaha xubin kamid ah ururka.

Dhaqanka sharci darrada ah lama ogolaan doono. Haddii aad aaminsantahay in xuquuqahaaga mise xuquuqaha kuwa kale lagu xadgudbay, waa inaad dagdag ula xiriirtaa NLRB si ay u ilaaliso xuquuqahaaga, guud ahaan lix bilood gudahood marka howsha sharci darrada dhacdo. Waxaad weydiisan kartaa wax kusaabsan macquulgalka xadgudubyada shaqo bixiyahaaga la'aantiis mise qof kasta oo kale oo lagu wargaliyay weydiinta. Eedeymaha waxaa buuxin kara qof kasta oo uma baahna inuu si toos ah u buuxiyo shaqaalaha ay saameysay xadgudubka. NLRB waxay ku amri kartaa shaqo bixiyaha inuu dibu shaqaaleeyo shaqaale lagu ceyriyay si xadgudub ku ah sharciga islamarkaana la siiyo mushaharaadkii lumay iyo dheefaha, oo waxaa suurtagal ah in lagu amro shaqo bixiyaha mise ururka inay joojiyaan xadgudubka sharciga. Shaqaalaha waa inay u raadsadaan caawin goobta ugu dhow ee xafiiska NLRB, taasoo laga heli karo shabakada wakaaladda: www.nlrb.gov.

- **Qaato tallaabo kale oo xun oo adiga kaa dhan ah oo** ku salaysan inaad ku biirtay mise taageertay ururka.

*Haddii adiga iyo saaxiibadaada shaqada aad doorataan urur si aad u noqotaan wakiilkaaga gorgortanka wadajirka ah, shaqo bixiyaha iyo ururkaaga ayaa looga baahanyahay inay si daacad ah ugu gorgortamaan dadaal dhab ah si aad u gaartaan heshiis qoran, oo fulinaya islamarkaana dajinaya shuruudahaaga iyo shuruucdaada shaqada. Ururka waxaa looga baahanyahay inuu si cadaalad ah kuugu matalo gorgortanka iyo fulinta heshiiska.*

Waxaad sidoo kale laxiriiri kartaa NLRB adigoo wacaya lambarka bilaashka: 1-844-762-NLRB (6572). Caawin luqad ayaa diyaar ah. Wacayaasha naafada qaba ee raba inay la hadlaan wakiilka NLRB waa inay u diraan iimayl relay.service@nlrb.gov. Wakiil NLRB ayaa iimayl u diri doona codsadaha isagoo wata tilmaamo kusaabsan sida loo qabsado ballan wicitaanka adeegga gudbinta.

**MARI ISKAAN SI AAD U OGAATO WAX BADAN**

hanjabaadda inaad qaado mid kamid ah tallaabooyinkan, sababtoo ah waxaad ku biirtay mise taageertay urur shaqaale, mise sabab ah awgeed waxaad kaqeybgashaa howlo wadajir ah oo loogu talagalay gargaarka iyo ilaalinta wadajirka ah, mise sabab ah inaad dooratay inaadan kulug yeelan howlahaas.

- **Kuugu hanjaba inuu xiro goobtaada shaqada** haddii shaqaaluhu doorto urur matala iyaga.
- **Kuu ballanqaado deeq dallacaad, mise mushahar kordhin, mise dheefo kale** si uu u niyad jabiyo mise dhiirrigaliyo taageerada urur.
- **Kaa mamnuuco inaad xirato koofiyadaha ururka, galuusyada, funaanadaha, iyo biinanka goobta shaqada** marka laga reebo xaalado gaar ah.
- **Jaajuusa mise ka duuba muuqaal hawlaha urur nabad** iyo isku imaadka mise uu iska dhigo inuu sidaas sameynayo.

*Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka ayaa ceymiya inta badan shaqaalaha ururada-gaarka ah. Waxaa ka reeban ceymiska hoos yimaada NLRA in shaqaalaha-dadweynaha, beeraleyda iyo guryaha, kunturaadlayaasha madaxa bannaan, shaqaalaha ushaqeeya waalidka mise xaaska, shaqaalaha hawada iyo tareenka xamuulka qaada ee uu ceymiyay Xeerka Shaqada Tareennada, iyo kormeerayaasha (inkastoo kormeerayaasha loo takooray inay diideen ku xadgudubka NLRA in la ceymin karo).